

VIDEO TRANSCRIPT: Minnesota's New Education Commissioner (Somali)

Waan idin salaamayaa, waxaan ahay Koomishineerkiina cusub ee Waxbarashada Heather Mueller.

Marka hore, waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Gudoomiye Tim Walz iyo Marka hore, waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Gudoomiye Tim Walz iyo Gudoomiye ku Xigeen Peggy Flanagan oo ii ogolaaday fursad aan ku hogaamiyo Waaxda Waxbarashada ee Minnesota wakhtigan xasaasiga ah.

Tan iyo markii aan dhashay, waxbarashadu waxay qayb muhiim ah ka ahayd noloshayda. Waalidiintay waxay wax ka dhiganayeen kuliyadda bulshada (community college) ee ku taalla magaaladayda Yuma, Arizona, wayna i taageereen markii aan ku iri waxaan rabaa inaan raaco raadkooda oo aan waxbarto si aan bare uga noqdo Jaamacadda Mankato State.

Tan iyo maalintii aan diyaaradda kaga soo degay Minnesota, waxaan ogaa inay tani noqonayso gurigaygii isoo korsaday. Minnesota waa meeshii aan ku sii horumariyey waxbarashadayda oo aan ka noqday macallin, xaas iyo hooyo.

Sanadkii la soo dhaafay, waxaan si wada jir ah ula shaqaynayey iskuulada Minnesota, barayaasha, qoysaska iyo ardayda sidii aan uga jawaabaynay aafada COVID-19. Waxaan la arkay oo aan lawada kulanay caqabadaha hortaagan nidaamkeena waxbarasho sanadkan dhammaantiin. Waxyaabahaas oo dhan intii lasoo marayey, adkaysiga reer Minnesota ayaa soo baxay.

Aad ayaan ugu hanweynahay qof kasta iyo xubin kasta oo ka tirsan bulshada iskuuladeena oo sii waday in ay geliyaan wakhti iyo dadaal si loo hubiyo in arday kasta uu fursad helo iyo uu helo waxbarashadiisa. Waxaan si gaar ah ugu hanweynahay ardaydeena laqabsaday, oo xaalado badan, ka soo gudbay caqabadihii sanadkan lasoo inala soo gudboonaaday.

Inta ay dad badan oo reer Minnesota ah ay qaataan tallaalkooda, aniga, sida Gudoomiye Walz - waxaan si taxaddar leh ugu rajo weynahay in aynu kasoo gudbi doonno. In kasta oo aynu weli u baahanahay in aynu taxaddarro sababta oo ah ku fiditaanka bulshada ee sii socota ee COVID-19, Waaxda Caafimaadka ee Minnesota ayaa bixisay hagitaan ku saabsan sidii aynu ugu ilaalin lahayn bulshooyinka iskuuladeenu in ay caafimaad qabaan.

Marka lagu daro aasaaska nadiifinta, gacmo-dhaqashada iyo kala fogaanshaha jir ahaan, waxaan sidoo kale ognahay in xirashada maaskarada iyo gaashaanka wajigu ay yarayn kartaan ku faafitaanka goobaha iskuulka. Iyo iyadoo la siinayo dhamaan reer Minnesota baaritaan bilaash ah ee COVID-19, ardayda iyo shaqaalaha iskuulka si joogto ah ayaa looga baari karaa si loo joojiyo ka dillaaca ka hor inta uusan dhicin - gaar ahaan iyada oo uu jiro

kor u kaca noocyada kala duwan ee cudurku bulshadayada. Guddoomiye Walz ayaa wuxuu sidoo kale mudnaanta u siiyay shaqaalaha iskuulka iyo shaqaalaha daryeelka caruurta tallaalka COVID-19.

Wakhtigan xaadirka ah - DHAMMAAN iskuulada Minnesota waxay haystaan ikhtiyaarka in ay ardaydooda waxbarashada ku siinayaan shaqsi ahaan illaa iyo inta ay qaadayaan talaabooyin si ay caafimaadka bulshadooda u ilaaliyaan. Waan ognahay in iskuul walba uu leeyahay baahiyo, caqabado iyo fursado u gaar ah. Taas natiijadeed, dhammaan degmooyinka iskuulada iyo iskuulada charter-ka waxay leeyihiin qorshe maxalli ah oo ay abuurteen, oo u gaar ah, si loo ilaaliyo ammaanka barayaasha, shaqaalaha, ardayda iyo qoysaska iyadoo la bixinayo waxbarasho isku dhaf ah ama shaqsi ahaan loo imaanayo.

In kasta oo qorshe kastaa laga yaabo in uu u muuqdo in uu waxoogaa ka duwanyahay, iskuulada bixiya waxbarashada shakhsi ahaanta ahi waa inay:

- Ardayda in ay isugu geeyaan kooxo tiro yar oo wada jooga intii suurtagal ah inta lagu jiro maalinta iskuulka.
- In laga codsado ardayda inay xirtaan maaskaro.
- In la siiyo dhammaan shaqaalaha iskuulka maaskaro iyo gaashaanka wajiga.
- In mudnaanta la siiyo shaqaalaha iskuulka ka baaritaanka COVID-19 toddobaad-dhaaf kasta.
- In la nadiifiyo dhismaha maalin kasta oo si joogto ahna loo nadiifiyo dusha sare ee meelaha taabashadu ku badantahay maalintii oo dhan.
- In la xaddido soo booqdayaasha aan muhiimka ahayn, oo ay ku jiraan mutadawiciintu.
- In lala socdo jirrada shaqaalaha iyo ardayda.
- In guriga loo diro shaqaalaha iyo ardayda marka ay muujinayaan astaamaha COVID-19.

Iskuulada waxaa laga filayaa inay qorshayaashooda si toos ah ula socodsiiyaan shaqaalahooda, qoysaskooda iyo ardayda iyadoo ah luqado qoran iyo kuwa afka ah iyadoo lagu salaynayo baahida bulshada.

Haddii aad rabto inaad wax dheeraad ah ka ogaato Qorshaha Waxbarasho ee Ammaanka ah ee Minnesota, fadlan booqo education.mn.gov.

Waad ku mahadsan tihiin, Minnesota dulqaadkiina, la qabsigiina iyo sida aad ugu heellantihiin waxbarashada. Waxaan rajeynayaa inaan idin la lashaqeeyo aniga oo ah Koomishineerkiina Waxbarashada.

Wadajir, waxaan u hubin karnaa in ardaydeena, mid walba in, uu helo marin, ka qaybgalo, matalo, la qaddariyo, la arko lana maqlo, oo ikhtiyaarro u helo noloshooda iyada oo aan loo eegin qowmiyada ama deegaanka (zip code).